



# Waxa al sameeyo haddii aad gafto dacwo Qaadid laanta Socdaalka ah (Immigration) (Sida loo xareysto Codsii Dib u Furida ah)

What to Do If You Miss Your Immigration Hearing - (How to File a Motion to Reopen)



Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa waxa la sameeyo haddii aad gafto dhagaysi maxkamadda laanta socdaalka uuna xaakim amro in lagaa saaro wadanka United States. Waxa ay kula wadaagi sidda loo waydiisto maxkamadda inay kaa qaado amarka saarida aha ayna kuu ogolaato inaad soo bandhigto kiiskaaga si aad uga hortagto masaafurin. Waxa ay leedahay tusmo ku saabsan codsiga aad u baahan tahay inaad ka xareyso maxkamadda.

Waa in aad isticmaasho warqadan xogta aruursan ah haddii aad gaftay dacwo qaadidaadii laanta socdaalka (immigration) aadna haysato amar saarid ah. Waa aad og tahay inaad haysato amar saarid ah marba haddii aad hesho warqad uu saxiixay xaakim oo oronaysa waxaa aad gaftay dacwo qaadidaaddii waxaana la amray in wadanka lagaa saaro. Waxa aad ka eegi kartaa kiiskaaga khadka (online) ee bogga <https://acis.eoir.justice.gov/en/>. **Ma AHA inaad isticmaasho warqadan xogta aruursan ah** haddii aad tagtay dhamaan dacwo dhagaysiyadaaddii xaakim na uu xukumay inaad joogi karin wadanka United States. **Ma AHA inaad isticmaasho warqadan xogta aruursan ah** haddii aad heshay amar saarid ah oo uu saxiixay sarkaalka ka tirsan hay'adda ICE ee uusan saxiixin xaakim. Haddii aadan hubin waxa uu amarkaaga saariddu leeyahay la tasho qareen qaabilsan sharciyadda laanta socdaalka (immigration).

Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay'adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waxaana gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).

# Waxa dhici haddii aan gafo dacwo dhagaysi

## Maxaa dhici haddii aan gafo qaadid maxkamad laanta socdaalka ah?

Xaakim ayaa amari kara in lagaa saaro wadanka United States. Taa macnaheedu waa waxa aad khatar u tahay in wadanka lagaa masaafuriyo markii la rabo. Waxa aad uga heli warqad maxkamadda boostadda la yiraa ‘amarka saarida.” **Waxa ay oran waxa aad imaan wayday qaadiidii maxkamaddii lagu qabtay ee masaafurinta ama dhagaysigii dacwaddii saarida ahayd.** Taa macnaheedu waa ma aadan tagin maxkamaddi si aad ugu mudacdo kiiskaaga. Tan marmarka qaarkood waxaa la yiraa amarka saarida ee “maqnaanshaha” ah. Xaakimka ayaa amara saarid ah kuugu soo diri boostada ciwaanka ay maxkamaddu ka hayso. Haddii aad guurtay aadana u sheegin maxkamadda, amarka saarida ahi waxa uu aadi ciwaankii hore. Waa khasab inaad maxkamadda u sheegto mar walba oo aad guurto. Barta LawHelpMN waxa ay haysaa xog aruursan oo ka hadasha sidda loogu sheego maxkamadda inaad guurtay. Gal barta: [lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/reporting-change-address-immigration-court](http://lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/reporting-change-address-immigration-court).

## Siddee ayaan ku ogaan in xaakim amray in la iga saaro wadanka U.S.?

Haddii aad gafto dacwo qaadid, wac ama gal khadka (online) ka si aad u ogaato in xaakim amray in wadanka lagaa saaro iyo in kale.



**Telefan ahaan.** Wac khadka EOIR ee ah **1-800-898-7180**. Khadkan waa Ingiriis iyo Isbaanish. Riix 2 si laguugu caawiyo afka-Isbaanishka. Geli Lambarkaaga-A ama “Lambarka Diiwaangelinta Ajnabiga.” [Gal barta [immigrationhelp.org](http://immigrationhelp.org) si aad u ogaato sidda lagu helo A-Lambarkaaga (A-Number.)] Cod horey loo duubay ayaa oran in la amray in wadanka lagaa saaro iyo in kale ama haddii aad leedahay balan dacwo qaadid ah oo kuu qabsan.



**Khadka (Online).** Booqo [acis.eoir.justice.gov](http://acis.eoir.justice.gov). Geli A-Lambarkaaga (A-Number.) waxa uu kuu sheegi in la amray in wadanka lagaa saaro iyo in kale ama haddii aad leedahay balan dacwo qaadid ah oo kuu qabsan.

## Maxaan sameeyaa haddii uu xaakim amro in la iga saaro wadanka U.S.?

Go’aanso inaad rabto inay waydiisato maxkamaddu inay dib u furto kiiskaaga iyo in kale. Wax fiican iyo wax xumiba waa ay dhici karaan haddii aad codsato in dib u furto kiiskaaga. Kala tasho qareen laanta socdaalka (immigration) sharciyadeeda yaqaan fursadda laga yaabo in maxkamaddu ay dib u furto kiiskaaga. Kiis walbaa waa uu ka duwan yahay kuwa kale. Go’aanka aad hesho haddii aad dib u furto kiiskaagu waxaa uu ka duwanaan karaa kan saaxiibkaa, dariskaa ama inadeerkaa uu helay haddii ay codsadaan in dib loo furo kiisaskooda.



**Waa maxay sababta ay u FIICNAAN karo in dib loo furo kiiskaaga**



**Waxa aad haystaa fursad aad uga codsato sharci maxkamad.**

Haddii lagu ogolaado sharci:

- Waa aad ku noolaan kartaa kana shaqeysan kartaa Mareykanka (U.S.)
- Waxa aad ka heli kartaa maxkamaddu inay baajiso masaafurintaadii.



**Waxa aad xareysan kartaa codsiyo si aad u noqoto qof ku leh deganaansho rasmi ah Mareykanka (U.S.) haddii aad noqoto qof xaq u leh mustaqbalka.**

Haddii aadan dib u furin kiiskaaga, waa ay adkaan doontaa inaad noqoto deganaade rasmi ah.



**Laanta Socdaalka iyo Ilaalinta Kastanku (ICE) kuma masaafurin karto inta aad sugayso in maxkamaddu go'aansato dib u furitaanka kiiskaaga.**

Waxaa heli kartaa waxa la yiraa “ka reebid saaridda.” Haddii hay'adda ICE ay isku daydo inay ku masaafuriso ama aad leedahay iska xaadirinta ICE inta aad sugayso go'aanka codsigaaga dib u furida kiiskaaga ah, tus hay'adda ICE dacwadaada dib u furida ah.



**Waxa aad haysataa fursad aad ugu dagaalanto kiiskaaga.**

Waa aad ogaan doontaa goorta iyo goobta ay dacwo qaadidaada ugu dambaynta ee laanta socdaalku ay dhici doonto. Waxa aad heli doontaa waqti aad ku soo aruursato dukumiintiyadda aad maxkamadda ugu baahan tahay. Waxa aad qorsheyn kartaa sidda loogu sheego sheekadaada xaakimka laanta socdaalka. Haddii aadan dib u furin kiiskaaga, hay'adda ICE waa ay ku masaafurin kartaa markii ay rabto. Waxaa dhici karta inaad helin fursad aad ugu diyaariso qoyskaaga taa ama aad ku qabato waxyaabaha aad doonayso inaad qabasto.



**Waa maxay sababta ay u XUMAAN karto in dib loo furo kiiskaaga**



**Hay'adda ICE way ogaan doontaa meesha aad ku nooshahay.**

Kolka aad waydiisato maxkamadda laanta socdaalka (imiigration) inay dib u furto kiiskaaga, waa inaad u sheegto ciwaankaaga iminka. Maxkamaddu waxa ay la wadaagi ciwaanka cusub hay'dda ICE. Haddii maxkamaddu ay go'aansato **inaysan** dib u furin kiiskaaga, hay'adda ICE waa ay ogaan meesha aad ku nooshahay. Taasi waxa ay ka dhigi inay u sahlanaato ICE inay ku masaafuriso.



**Dadka qaarkii ee lagu soo eedeeyo ama lagu helo dambiyadda qaarkood waxaa lagu hayn karaa goobo ay hay'adda Ice ay khasab tahay inay dadka ku hayso.**


Taa macnaheedu waa waxaa ku haynaysaa hay'adda ICE dhamaan waqtiga aad ka sugayso go'aanka xaakimka laanta socdaalka. Ma aad waydiisan kartid lacagta inaad dhigto si aad ugu baxdo meesha ay hay'dda ICE dadka ku hayso. **La tasho qareen khidad u leh sharciyada laanta socdaalka (immigration) ka hor inta aadan xareysan dacwo dib u furid ah haddii:**

- **Lagugu soo eedeeyey, ama lagu xiray, ama lagugu helay ama aad qiratay inaad gaystay dambiyada** guri jabsi, xatooyo, booli, dukaan wax ka xadid, gacanqaad askari aad u gacan qaaday ama wax dambi ah oo kale oo keena geeri ama dhaawac jireed oo culus.
- **Aad jaa horey laguugu ogolaan United States.** Taa macnaheedu waa waxa aad timid Mareykanka (U.S.) adigoo fiisa haysan ama la'aan ogolaansho aad ku soo gasho wadanka.

## Hadii aan go'aansato inaan dib u furto kiiskayga, sidee u sameeyaa?

Xareyso “dacwo aad dib u furayso amar maqnaansho ah.”

- **Waa khasab inaad ku xareysato 180 cisho gudahood** laga bilaabo maalinta xaakimku ku amray in wadanka lagaa saaro, Dacwadaadda, ku sheeg sababta aad u gaftay balanta dacwo qaadida. **La tasho qareen khibrad u leh sharciyadda laanta socdaalka haddii aad gafto waqtiga ugu dambeeya ee dacwadda la soo xareysan karo.** Marmarka qaarkood waxa aad xareysan kartaa dacwo dib u furid ah ka dib 180 cisho ee la iska la rabo in lagu xareysto. Waxa aad u baahan tahay inaad la timaado sabab gaar ah oo ka dhigtay wax adag inaad ku soo xareysto dacwadda waqtigii loogu talagalay.



**Tusaale ahaan: Jorge madaxa ayuu ka jiranaa.**



**Tusaale ahaan: Janice waxa ay u xirnayd dowladda dhexe.**



**Tusaale ahaan: Julie waxa ay ahayd ilmo.**

Julie ma aysan haysan waalid ama cid mas'uul ka ah oo la taliso. Ma aysan ogaan amarka saarida ah ka hor intii ay gaartay 18-sanno jir.

- **Waxa aad xareysan kartaa codsi dib u furid dacwo ah 1 mar.** Haddii codsiga la diido, ma aad xareysan kartid codsi kale si kiiska dib loogu furo. **Soo aruuri dukumintiyadda aad ugula dirayso maxkamadda dacwadaadda dib u furida ah** si aad cadeyso sababta aad u gaftay dacwo qaadidda. Ka eeg qaybta “Sidda loo xareysto Codsi si Dib loogu Furo Amar Maqnaansho ah” ee warqadan xogta aruursan ah tusaalayaal.
- **La tasho qareen khibrad u leh sharciyadda laanta socdaalka ka hor inta aadan xareysan dacwadaadda haddii aad awoodo.** Qareenku waxa uu kaa caawin karaa inaad sameyso muduc fiican aadna akhbaarta ugu fiican ee aad diri karto aad dirto.

## Waa maxay sababaha ay maxkamadu dib ugu furi karto kiiskayga?

Waa khasab inaad haysato sabab fiican oo ah sababta aad u gaftay dacwo qaadidaadii si maxkamaddu ay dib ugu furto kiiskaaga. Tusaalooyin “sababaha fiican” ahi waa:

- Warqadaha boostadda waxaa lagu diray guriga eedo. Eedana kuuma sheegin in aad dacwo qaadid leedahay.
- Waxa aad tagtay maxkamad khalad ah waayo goobta dacwo qaadida ayaa la bedelay.
- Gaarigii ayaa kaa halaabay adigoo u soo socda goobta dacwadda lagu qaadayey.
- Maxkamaddu kuuma keenin turjubaan ku hadlan afka aad inta badan ku qanacsan tahay inaad isticmaasho. Ama aadan aqoon goorta, sida, ama meesha loo aadayo maxkamada.

Kuwaasi ma aha sababaha kaliya ee ay maxkamaddu dib ugu furi karto kiiskaaga. Haddii ay uu kugu dhacday wax kaa hor istaagay tagida maxkamadda, waxa aad haysataa sabab fiican oo aad ku waydiisato maxkamadda inay dib u furto kiiskaaga.

## Xagee ayaan ka heli karaan qareen i caawiya?

Ka baar qareeno lacag la’aan ah iyo rugo gargaar dhanka sharciga ah bixiya barta [LawHelpMN.org](http://LawHelpMN.org). Qareenadda lacagta la’aanta ahi aad baa loo rabaa. Lagaama balan qaadi karo in qareen lacag la’aan ah in lagu helo codsigaaga uun awgii, Waxaad kaloo la hadli kartaa qareen iskii u shaqeysta haddii aad awoodo inaad bixiso \$200 ee kulanka koowaad.

## Maxaa dhici haddii codsiga dib u furida kiiskayga la ansixiyo?

- **Balan cusub oo dacwo qaadid ah ayaa lagu qaban. Waa khasabi inaad tagto balanta!** Waxa aad ku heli ogaysiis qoran boostadda oo oranaya codsigaagii waa la ansixiyey. Waxaana ku qornaan doonta waqtiga cusub iyo goobta dacwa qaadidaada. Sidoo kale waad soo wici kartaa ama waxa aad ka eegi kartaa akhbaarta dawco qaadidaada khadka.
- **Hubi inay maxkamadu hayso ciwaankaaga saxda ah.** Waa muhiim inay maxkamadu ay taqaan ciwaankaaga iminka. Haddii aad guuro, u dir foomka ciwaan bedelida maxkamadaada.



### U diyaargarowga maxkamad tagida marka ugu horeeysa.

Barta LawHelpMN waxa ku jira xog aruursan oo ku saabsan waxa la sameeyo ka hor dacwo qaadida maxkamadda laanta socdaalka. Waxa ay ka hadashaa waxa la fili kolka aad tagto maxkamadda. Waxay kaloo kaa caawin kartaa helid akhbaarta dacwadda. Mari kooda QR (QR code) ama gal barta: [lawhelpmn.org](http://lawhelpmn.org)



### Ka Bedelida Ciwaankaaga Maxkamadda.

Buux Foomka EOIR-33IC ka diba u dir maxkamadda. Foomka waxa uu ku jiraa barta [justice.gov/eoir/file/640016/dl?inline](http://justice.gov/eoir/file/640016/dl?inline) LawHelpMN waxa ay haysaa xog aruursan oo kaa caawinaysa ka ciwaan bedelida maxkamadda. Mari kooda QR (QR code) ama gal barta: [lawhelpmn.org](http://lawhelpmn.org)

## Maxaa dhici haddii codsigayga dib u furida kiiska ah la diido?

Racfaan uga qaado go'aanka Golaha Racfaanadda ee Laanta Socdaalka. Haddii aad racfaan xareysato, waxaa lagu ogolaan markiiba "joogid wadanka" ah ilaa iyo inta go'aanka racfaanka laga gaarayo. Taa macnaheedu waxaa weeye laguma masaafurin karo ilaa inta xaakim uu go'aan ka gaarayo ku saabsan racfaankaaga. Waa inaad ku xareystaa racfaankaaga 30-cisho gudahood kolka la diido codsigaaga dib u furida kiiskaaga ah. **Hel qareen kaa caawiya racfaanka.** Mashruuca la yiraa (Florence Immigrant and Refugee Rights Project) ayaa leh hage ka hadla sidda racfaan lagu qaato. Gal barta: [firrp.org/media/BIA-Appeal-Guide-2013\\_new-BIA-address-2013.pdf](http://firrp.org/media/BIA-Appeal-Guide-2013_new-BIA-address-2013.pdf)

# Nidaamka Dib u Furida Kiiskaaga

## Siddee ayaan dib ugu furi karaa kiiskayga laanta socdaalka (immigration)?



### TALAABADA 1

#### Buuxi codsi dib loogu furayo amar maqnaasho ah.

Tilmaamo iyo tusmo ayaa ku jira qaybta “CodigaTusmadda ah ee Dib u Furida Amarka Maqnaashaha” ee warqada xogta aruursan. Waxa aad u baahan tahay inaad buuxiso bog banaan. Mari QR kooda (QR code) ama gal shabakadda (website) si aad u hesho bogga banaan:

[lawhelpmn.org/sites/default/files/2024-09/Blank Immigration Motion to Reopen.pdfs](http://lawhelpmn.org/sites/default/files/2024-09/Blank%20Immigration%20Motion%20to%20Reopen.pdf)



### TALAABADA 2

#### Soo aruuri qoraalada aad la dirayso codsigaaga.

Soo dir 4 waxyaabood:

- **Codsiga Dib u Furida Amarka Maqnaashaha ah.**
- **Daliil cadeeysa sababta aad u gaftay qaadida dacwada.** Tusaalayaal ah waxa ay tahay inaad soo dirto “Tusaalayaal Daliilaaha aad la soo Dirayso Dacwadaada” oo qayb ka ah warqadan xogta aruursan ayaa jira.
- **Foomka Bedelida ciwaanka/akhbaarta la soo xiriirida.** Foomka EOIR-33 (Form EOIR-33) waxa uu jiraa barta: [justice.gov/eoir/file/640016/dl?inline](http://justice.gov/eoir/file/640016/dl?inline)
- **Rasiidka khidmada AMA codsiga khidmad saamixida.** Waa khasab inaad bixiso khidmadda **KA HOR** inta aadan xaraysan dacwadaadda aadna soo dirto rashiidka lacag bixinta.
  - **Magangelyo dalbadayaasha:** Khidmadi ma jirto. Waa khasab inaad la soo dirto dalbashadaada magangelyadda (Form I-589) codsigaagga.
  - **Cid walba oo kale:** waxaa jirta khidmad \$1065 oo la bixiyo si loo xareeyo codsi dib u furid ah. Soo dir codsiga khidmad saamixida (Form EOIR-26A). Ka hel foomamka barta: [justice.gov/eoir/page/file/1237856/dl](http://justice.gov/eoir/page/file/1237856/dl).
  - **Haddii lacag badan aad sameyso si aad xaq ugu yeelato ka saamixida khidmadda:** La hadal qareen yaqaan xeerarka laanta socdaalka.



### TALAABADA 3

Ka samee 3 nuqul codsiga iyo dukumiintiyadda gargaaraya. Kala har 1 nuqul wax walba.



### TALAABADA 4

Boostadda ugu dir 1 nuqul oo codsiga iyo dukumiintiyadda gargaaraya maxkamadda amartay in wadanka lagaa saaro.

Hel magaca iyo ciwaanka maxkamadda amartay in lagu saaro:

- **Telefan ahaan.** Wac khadka EOIR **1-800-898-7180**.
- **Khadka (Online).** Go to [acis.eoir.justice.gov](https://acis.eoir.justice.gov).



### TALAABADA 5

Boostadda u dhig 1 nuqul oo codsiga iyo dukumiintiga gargaaraya ah qareenka dowladda ama “xafiiska OPLA.”

Tan waxaa kaloo la yiraa “u geynta qareenka dowlada.” Tani waa ay ka duwan tahay ciwaanka maxkamadda. Si aad u hesho xafiiska OPLA ee maxkamadaada loo xil-saaray:

- **Wac maxkamada amartay in lagu saaro.** U sheeg inaad isku dayeyso inaad xareysato codsi dib u furid amar maqnaansho ah. Waydii magaca iyo ciwaanka xafiiska OPLA ee loo xil-saaray maxkamadaada.



### TALAABADA 6

Eeg in kiiskaaga dib loo furay.

Maxkamaddu waxa ay boostadda kuu soo dhigi warqad ku saabsan go’aankeeda. Haddii kiiska dib loo furay, balan cusub oo dacwo qaadidaada ah ayaa lagu qaban. Inta aad sugayso warqadda, wac ama ka eeg shabakada si aad u aragto in aad leedahay balan dacwo qaadid ah oo lagu qabtay. Waxaa lagu sheegi, taariikhda, waqtiga, iyo goobta dacwo qaadidaada.

- **Telefan ahaan.** Ka wac EOIR khadka ah **1-800-898-7180**. Geli A-Lambarkaaga (A-Number) ama “Lambarka Diiwaagelinta Ajbaniga.” Isticmaal taxaalka kala doorashada waxyaabaha si aad u eegto taariikhda iyo waqtiga dacwo qaadidaada. Khadku waa afafka Ingiriiska iyo Isbaanishka. Riix 2 si laguuga caawiyo afka isbaanishka.
- **Khadka (online).** Gal barta [acis.eoir.justice.gov](https://acis.eoir.justice.gov). Geli A-Lambarkaaga (A-Number). Fiiri “Akhbaarta Dacwo Qaadida Xigta” iyo “Akbaarta La soo Xiriirika Maxkamadda.”



# Tusaalayaal Daliilaha lala Diro Dacwada

## Daliil caynkee ah ayaan soo diraa oo ku saabsan sababta aan u gafay dacwo qaadidda?

Dir wax walba oo dukumiintiyo ah oo cadeynaya sababta aad u gaftay dacwo qaadidaadda.

**Dukumiintiyadaa waa khasab in la soo diro iyagoo af Ingiriis ah.** Haddii dukumiintiyadda asalkoodu uusan Ingiriis ahayn, waa khasab in ciddi turjunto. Uma baahnid inaad isticmaasho turjubaan ama tafsiire xirfadle ah. Qof labo af ku hadla oo ehel ah, ama saaxiib ah, ama aad taqaan ayaa sameyn kara. Waa khasab in qofkaasi inuu buuxiyo foomka turjubaanka. Ka hel foomka safsiiraha oo banaan barta: [lawhelpmn.org/sites/default/files/2025-02/Immigration Certificate of Translation.pdf](http://lawhelpmn.org/sites/default/files/2025-02/Immigration%20Certificate%20of%20Translation.pdf)



### **Tusaale: Daniela waa ay guurtay mana aysan helin ogaysiiskii dacwo qaadideeda.**

Daniela waa inay soo diro wax walba oo muujinaya inay ku nooshahay ciwaaan kale: Taasi waxay noqon kartaa:

- Dukumiintiyo cadeynaya ciwaankeeda cusub, sidda biil koronto.
- Warqad ciwaan bedelid ah oo ay ka keento Adeega Boostada ee U.S. (U.S. Postal Service).
- Warqad saxiixan oo ay ka keeto qof ehel ah oo oranaysa Daniela aniga ayey ila noolayd ilaa iyo [taariikhda] ka dibna waa ay guurtay.
- Ciwaan ka bedelid maxkamadda. Foomkan gaar looma xareyn karo. Daniela waxay u baahan tahay inay la soo dirto codsigeeda dib u furida kiiskeeda.

Daniela siddoo kale waa inay soo dirtaa wax walba oo muujinaya inaysan maxkamadda u sheegin guuritaankeeda. Taasi waxay noqon kartaa:

- Dukumiinti muujinaya maxkamad kale oo waalidka iyo ilmaha ah inay ku jirtay xilligii dacwo qaadideeda. Waxay kaloo soo diri kartaa dukumiintiyo kale oo muujinaya inaysan isku halayn karin qofka weyn ee daryeel-siiyaha u ah iyadu inuu maxkamadda geeyo.
- Warqad saxiixan oo oranaysa in iyaddu ay ka yarayd 18 sanno jir xilligii dacwadeeda la qaadayey iyo inaysan lahayn qareen. Warqaddu waxa ay u sheegi kartaa maxkamadda inay hadda og tahay sidda loo bedelo ciwaankeeda.



### **Tusaale: Waxaa jiray baraf badan amaana uma ahayn Rooble inuu maxkamada gaari ku aado.**

Rooble waa inuu diro wax walba oo cadeeya inuu jiray baraf xun ama gaarigu uu ka xumaaday. Tan waxaa ku jiri kara:


- Nuqul ah warfaafinta deegaanka oo ka hadlaysa hawada xun maalinta Rooble dacwada qaadida lahaa. **Sheekaddu waa khasab inay ka hadasho goobta ay ahayd in Rooble gaarigiisa ku sii maro si uu u tago maxkamadda.**
- Rashiid gaari hagaajin ama jiidid gaari ku saabsan.



### **Tusaale: Isabella waa dhibane gacanqaad qoyska dhexdiisa ah loo geystay mana aysan tagi karin dacwo qaadideeda.**

Isabella waxay soo diri kartaa intii cadeyno ah ee ay rabto ee cadeyn kara in gacanqaad qoyskeeda dhexdiisa ah loo geystay. Siddoo kale waa inay dirto wax kasta oo ay awoodo si ay u cadeeyso inaysan maxkamadda tagi karin waayo dagaal qoyska dhexdiisa loogu geystay. Kuwaa waxay nooqn karaan:

- Cadeyn in Gacanqaad Qoyska ah loo geystay.
  - Dhamaal qoraal oo dhaar ah ama dhambaalo WhatsApp ah oo ay heshay.
  - Qoraalo caafimaad oo muujinaya inay daryeelo heshay.
  - Qoraalo telefano bilayska ah oo ay Isabella wacday si ay caawimaad uga hesho.
- Cadeyn ah inaysan Tagi Karin Maxkamadda Waayo Dagaal Qoyska Dhexddiisa loogu Geystay
  - Warqaddo muujinaya in Isabella ay tagtay iska-xaadirinteeda laanta socdaalka iyo Kastanka (I.C.E.).
  - Dhambaalo qoraal ah ama warqaddo muujinaya inay isku dayday inay hesho gaadiid u qaada maxkamadda. Ilmaheeda, ehelkeed, ama asxaabteeda ayaa u qori kara warqadaha iyada.



**Tusaale: Astur ma ogeyn in dacwo qaadideeda loo wareejiyey maxkamada kale. Waxa ay tagtay maxkamaddii markii hore lagu balamiyey.**

Astur waa inay dirto wax walba oo cadeeya inay tagtay maxkamad kale. Kuwaa waxaa ku jiraa:

- Nuqul ah ogaysiiskeedii hore ee dacwo qaadideeda.
- Maxkamada ay tagtay waxaa dhici karta inay leedahay foom Bedelid Goobta ah oo shaabad leh oo ay siin karaan iyada.



**Tusaale: Andres qareenkeedu waxa uu siiyey waqti khaldan oo dacwo qaadideeda ah.**

Andres waxay soo diri kartaa wax walba oo cadeynaya in la siiyey akhbaar khaldan. Tani waxa ay noqon kartaa:

- Warqad laga keeno qareenka soo tilmaamaysa khaladka.

## Codsi Tusmo ah oo ku Saabsan Sidda Dib Loogu Furo Amar Maqnaasho ah



**Waxa aad u baahan tahay inaad buuxiso bog dacwo oo banaan si aad dib ugu furto.**

Mari QR kooda (QR code) ama gal shabakaddan (website) si aad uga hesho bog banaan: [lawhelpmn.org/sites/default/files/2024-09/Blank Immigration Motion to Reopen.pdfs](https://lawhelpmn.org/sites/default/files/2024-09/Blank%20Immigration%20Motion%20to%20Reopen.pdf) Tilmaamaha iyo tus mooyinka hoos ku xusan ayaa kaa caawin kara adiga inaad buuxiso xaashida dacwadaadda.

## Maxaa ku jira codsiga dib u furida ah?

Waxa uu u kooban yahay 4 qaybood codsiga dib u furida amarka maqnaanasha ahi. Qayb **walba waa khasab in lagu buuxiyo afka-ingiriiska.**

1. **Warqad daboolka ah.** Tani waxa ay maxkamadda u sheegi cidda aad tahay meesha aad ku gaftay dacwo qaadidaadda.
2. **Codsiga.** Tani waxa ay maxkamadda u sheegtaa sababta aad u gaftay dacwo qaadidaadii.
3. **Amarka.** Tani waa foomkii maxkamaddu buuxisay ayna diib kuugu soo dirtay. Waa sidda ay maxkamaddu kuugu sheegi in codsigaagii la ansaxiyey iyo in kale.
4. **Xaashida adeega.** Tani waxa ay u sheegi maxkamadda goorta iyo sidda aad ugu dirtay nuqul codsiga ah qareenka dowladda.

Ka hel nuqul banaan oo codsigan ah barta: [LawHelpMN](https://www.lawhelpmn.org/). Isticmaal tusmaayinka warqdan xogta aruursan ah si ay kaaga caawiso inaad buuxiso xaashida daboolka ah, codsiga, amarka, iyo warqadda adeega. Ku buuxi inta akhbaar ah ee ugu badan ee aad awoodo. Haddii aadan haynin qaar akhbaarta ka mid ah, sidda magaca xaakimka laanta socdaalka (immigration), soo dir codsiga isagoo leh inta akhbaar ah ee ugu badan ee aad awoodo.



*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.

MOTION TO REOPEN AN IN ABSENTIA ORDER: SAMPLE MOTION

Macagaaga : Halkan ku qor

Ciwaankaaga: Halkan ku qor ciwaankaaga

UNITED STATES DEPARTMENT OF JUSTICE  
EXECUTIVE OFFICE FOR IMMIGRATION REVIEW  
IMMIGRATION COURT

Magaaladda iyo gobolka: Ku qor magaaladda iyo gobolka maxkamadaada laanta socdaalka

In the Matters of:

Ku qor magacaaga oo buuxa halkan  
(Your Name)

File No.: A Qor lambarka ajnabiga  
(Alien Registrarion Number)

<u>Ku qor magaca buuxa ee ilmahaaga iyo xilahaaga</u> (Name)	File No.: A <u>Qor A-Lambarka ee ilamhaaga ama xilahaaga</u> (Alien Registration Number)
<u>Ku qor magaca buuxa ee ilmahaaga iyo xilahaaga</u> (Name)	File No.: A <u>Qor A-Lambarka ee ilamhaaga ama xilahaaga</u> (Alien Registration Number)

Kaliya ku dar qaybtan haddii aad xilo ama ilmo ay ku jiraan kiiskaaga laanta socdaalka.

Xaakimka laanta: Ku qor magaca xaakimka laanta socdaalka halkan

**CODSIGA DACWOODAHA SI DIB LOOGU  
FURO AMAR MAQNAASHO AH**

CODSIGA DACWOODAHA EE DIB U FURIDA AMAR MAQNAANSHO AH

## MOTION TO REOPEN AN IN ABSENTIA ORDER: SAMPLE MOTION

Dacwoodahu Ku qor magacaaga halkan, waxa uu waydiisanayaa Maxkamadan Sharafta leh inay dib u furto dacwooyinka ayna ka noqoto amarka saarida maqnaanshaha ah.

Si aan u gargaaro codsigan, waxa aan shaaci ka qaadi waxyaabahan soo socota:

- Qor taariikhda iyo goobta dacwadii ugu dambaysay ee aad maqnaatay (dacwadii aad ka maqneyd).
- Sheeg sababta aad u seegtay dacwadaada. Sii faahfaahin sida ugu badan ee aad awoodo. Waxaad sheegi kartaa:
  - Waxaad ku weysay ogeysiiska dacwadaada.
  - Adiga, ilmahaaga, ama waalidkaaga si xun bay u xanuunsadeen ama waalid ama ilmo ayaa geeriyooday.
  - Ma awoodin inaad u safarto maxkamada sababtoo ah cimilada oo aad u xumayd.
  - Adiga, ilmahaaga, ama waalidkaaga waxay ahaayeen dhibbanayaal xadgudubka guriga.
  - Waxaad ku jirtay xabsiga federaalka ama gobolka / xabsiga / jeelka.
  - Sabab kale oo ka baxsan awoodaada.
- Weydiiso in kiiskaaga dib loo furo.
- Qor bayaankan oo ku qoran Ingiriisiga. Waxaad weydiisan kartaa qof aad ku kalsoon tahay inuu kuu qoro Ingiriisiga haddii aadan awoodin inaad ku qorto Ingiriisiga.

Mahadsanid,

Halkan ku saxiix magacaaga

(Saxiixa)

Ku qor magacaaga oo buuxa halkan

(Magaca)

Ku qor taariikhda maanta halkan

(Taariikhda)

MOTION TO REOPEN AN IN ABSENTIA ORDER: SAMPLE ORDER

United States Department of Justice  
Executive Office for Immigration Review  
Immigration Court

Ku qor magaalada iyo gobolka maxkamadaada laanta socdaalka

[Goobta maxkamada (magaaladda ama bedelka) iyo gobolka]

In the Matter of: Ku qor magacaaga oo buuxa halkan

Alien Number: Ku qor lambarkaaga ajnabiga

ORDER OF THE IMMIGRATION JUDGE

Upon consideration of the respondent's **Motion to Re-Open an In Absentia Order**, it is  
HEREBY ORDERED that the motion be  **GRANTED**  **DENIED** because:

- DHS does not oppose the motion.
- The respondent does not oppose the motion.
- A response to the motion has not been filed with the court.
- Good cause has been established for the motion.
- The court agrees with the reasons stated in the opposition to the motion.
- The motion is untimely per \_\_\_\_\_.
- Other:

Deadlines:

- The application(s) for relief must be filed by \_\_\_\_\_.
- The respondent must comply with DHS biometrics instructions by \_\_\_\_\_.

\_\_\_\_\_ Date

\_\_\_\_\_ Immigration Judge

CERTIFICATE OF SERVICE

This document was served by:  Mail  Personal Service  Electronic Service  
 To:  Respondent  Respondent's C/O Custodial Officer  Respondent's Atty/Rep  DHS  
 Date: \_\_\_\_\_ By: Court Staff \_\_\_\_\_  
 Attachments:  EOIR-33  EOIR-28  Legal Services List  Other



Qaybtan iyadoo banaan ka tag. Maxkamada ayaa buuxin doonta qaybtan.

MOTION TO REOPEN AN IN ABSENTIA ORDER: SAMPLE CERTIFICATE OF SERVICE

Ku qor magacaaga oo buuxa halkan

(Respondant's Name)

Ku qor Lambarkaaga-A ajnabiga halkan

(Respondant's Alien Number)

CERTIFICATE OF SERVICE

On Ku qor taariikhda maanta halkan  
(date)

Halkan ku qor magacaaga oo buuxa halkan  
(printed name of person signing below)

served a copy of this **Motion to Reopen an In Absentia Order**,

and any attached pages to Ku qor "Xafiiska La Taliyaha Weyn ee Sharciga ee DHS – ICE" halkan  
(name of party served)

at the following address: Ku qor ciwaanka xafiiska OPLA halkan  
(address of party served)

by Qor sidda aad ugu diri doonto nuqul qareenka dowladda (xafiiska OPLA). Tusaale ahaan, "Boostada USPS ee mudnaanta leh (USPS priority mail)."  
(method of service, for example overnight courier, hand-delivery, first class mail)

Ku saxiix magacaaga halkan  
(signature)

Ku qor taariilkkhda maanta halkan  
(date)